

Xarunta caafimaadka ee Torvalla ayaa xidhan tahay tan iyo 1-da Juun 2018

WAXAAD DOORANAYSAA XARUN CAAFIMAAD

Waxaad adigu had iyo jeer dooran kartaa xarunta caafimaadka ee aad rabto inaad ka tirsanaato. Waxaad sidaas samayn kartaa adigoo soo galaya 1177.se oo isticmaalaaya adeega Dooro/Bedel (Välj/ändra) doorashada caafimaadka ama adigoo buuxinaaya foomka doorashada ee laga heli karo dhammaan xarumaha caafimaadka ama adigoo soo maraaya regionjh.se/halsoval. Foomka doorashada ayaad ama u soo direysaa ama u geynaysaa xarunta caafimaadka ee aad rabto inaad ka mid noqoto.

Qofka ka tirsanaan jirey xarunta caafimaadka ee Torvalla ee aan isagu dooran xarun caafimaad oo cusub ayaa ka tirsanaan doona xarunta caafimaadka ee Brunflo.

XARUNTA QOYSKA IYO WAAXDA DHIMIRKA EE BULSHADU (PSYKOSOCIALA) WAA AY SII JOOGAYAAN

Xarunta qoyska ee Torvalla waa ay sii joogaysaa. Taas macnaheedu waxa weeye inaad sii wadi karto booqashada aad ku aadeyso xarunta caafimaadka carruurta (BVC) iyo ruxarunta caafimaadka hooyada (MVC) ee Torvalla iyo in iskaashiga degmada Östersund ee la tixraacaayo fikradda xarunta qoyska ayaa sii jiri doonta. Waaxda dhimirka ee bulshada ayaa sidoo kale sii joogi doonta Torvalla.